

SIDA LOO SAMAYSTO AKOON

Si aad uga diiwaangeliso ganacsigaaga Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota, waxaad u baahan doontaa inaad ka samaysato Akoon Khadka Internetka.

Fadlan Ogsoonow: Laga bilaabo Diseembar 8, 2014 Akoon Khadka Internetka ah ayaa loo baahanyahay si loo dhammaystiro ku diiwaangelinta internetka. Wixii akoon ah ee khadka internetka lagu sameeyey kahor taariikhdani ma sii shaqayn doonaan. Akoonka khadka internetka waa uun magaca lagu galo iyo furaha sirta ah si loo dhammaystiro ku diiwaangelinta ama ku dalbashada khadka internetka. Waxaad u adeegsan kartaa hal Akoon oo Khadka Internetka ah si aad u dhammaystirto diiwaangelinta/dalbashada nidaamka Ganacsiga iyo Haysashada (Business and Liens system).

1. Abuuritaanka akoonka internetka ahi waa howl hal mar ah. Si aad u samaysato akoon internet ah:

- Booqo <https://www.sos.state.mn.us> ka dibna u gudub Business Filings Online, kadibna guji Create an Account (Akoon Samayso)
- Ku qor cinwaanka emailkaaga meesha loogu talagalay cinwaanka emailka
- Samayso furaha sirta ah oo aad xasuusan karto. (Ka eg shuruudaha furaha sirta ah hoos)
- Guji sanduuqa si aad u aqbasho xeerarka iyo shuruudaha.
- Guji "samayso akoon khadka internet ah"

Furaha sirta ahi waa in uu:

- noqdo ugu yaraan 8 xaraf dherer ahaan
- uu ku jiro ugu yaraan hal xaraf oo far waawayn ah
- uu ku jiro ugu yaraan hal xaraf oo far yaryar ah
- furaha sirta ah waa inuu ku jiro ugu yaraan hal lambar

2. Sug emailka xaqiijinta oo ka imanaya business.services@state.mn.us (link-gu wuxuuu shaqaynayaa 24 saacadood).

Haddii aadan email ku helin 24 saacadood gudahood, hubi faylkaaga spam. Haddii aadan weli helin, naga soo wac: 651-296-2803

3. Marka xigta, xaqiiji cinwaanka emailkaaga:

- Markaad hesho emailka, guji link-ga ku dhexjira emailka ama midigta ku guji (right click) link-ga oo dooro 'open hyperlink' ('fur xiriiriyaha').

- Tani waxay kuu gudbin doontaa shaashad aad gelin karto cinwaanka emailkaaga iyo furahaaga sirta ah ee aad ku samaysatay tillaabada 1. **Tallaabadani KUMA GELIN KARTO akoonka websaydka**, waxay qabanaysaa oo keliya in ay xaqiijiso inaan kaa hayno email sax ah.

4. Gal akoonka websaydka.

Waxaad hadda isticmaali kartaa isla cinwaanka emailka iyo Furaha sirta ah si aad ugu gasho akoonka websaydka.

Xasuusin Ku saabsan Macaamilka Maaliyadeed ee loo marayo USBank:

Websaytka USBank ayaa ku weydiin doona Aqoonsiga Adeegsahaha iyo Fure sir ah (ID and Password). **Kani MA aha isla magaca lagu galo iyo furaha sirta ah** oo loo adeegsado websaydka Xoghayaha Gobolka oo KUMA xiriirsana akoonkaaga bangiga shaqsiyeed ama ganacsi.

Websaydka USBank waxaa loogu talagalay dhammaystirka ku bixinta lacagaha elektaroonig ahaan iyada oo loo marayo Xoghayaha Gobolka. Aqoonsiga Isticmaalaha iyo Furaha sirta ah ee websaydka USBank **QASAB KUGUMA AHA**. Waxaad gujin kartaa **"Pay Without Registering"** **"Bixi Lacagta Bilaa Diiwaan Gelinta"** si aad ugu sii socoto bixinta lacagta adiga oo aan gelin akoonka USBank.

FURAHA SIRTA AH IYO CAAWINTA AKOONKA

Miyey dhibaato kaa haysataa inaad gasho akoonkaaga? Waa kuwan cilladaha guud:

Arrinta # 1: Waxay kula noqotay inaad samaysatay akoon, laakiin wuu kuu ogolaan waayay inaad gasho.

Tani waxay macnaheedu noqon kartaa inaad marnaba xaqiijinin cinwaanka emailkaaga. Kadib marka aad geliso cinwaanka emailka iyo furaha sirta ah oo aad gujiso badhanka "create account" ("samayso akoon", waxaad wali u baahantahay inaad gasho emailkaaga oo aad ka raadiso email xaqiijin ah oo laga soo diray business.services@state.mn.us.

Marka aad hesho emailkan, waxaad u baahan doontaa inaad gujiso link-ga ku jira emailkaas taas oo ku keenaysa websaydka aad ku xaqiijindoontid doonto ciwaanka emailkaaga. Marka aad xaqiijiso waxaad gujin kartaa "Sign In" (Akoonka gal) oo aad geli kartaa websaydka. Kadib waxaad dhamaystiri doontaa diiwaangelinta adiga oo gelinaya macluumaadkaaga keenista. Markaad geliso macluumaadka waxaad gujin kartaa "Save" (kaydi).

Haddii aadan ku xaqiijin emailkaaga 24 saacadood gudahood, waxaad u baahan doontaa inaad dib u bilowdo oo aad gujiso <https://mblsportal.sos.state.mn.us/Account/Register> si aad u bilowdo hawsha isdiiwaangelinta mar labaad.

Arrinta #2: waxaad illowday furahaaga sirta ah.

Haddii aad ilowday furahaaga sirta ah, guji Sign In (Gal).

Guji link-ga "Forgot Password?" ("Waan iloobay Furaha sirta ah?").

Ku qor cinwaanka emailkaaga oo guji batoonka "Request Password Reset" ("Codso Beddelaada Furaha sirta ah").

Ka sug emailka xaqiijinta oo ka imanaya business.services@state.mn.us.

Haddii aadan ku gelin link-ga beddelaada furaha sirta ah ee laguugu soo diray emailkaaga 24 saacadood gudahood, waxaad u baahan doontaa inaad dib u bilowdo oo aad gujiso 'Forgot Password?' ('Miyaad Ilowday Furaha sirta ah') si aad u bilowdo hawsha isdiiwaangelinta mar labaad.

Arrinta #3: Markaad isku dayeyso inaad samaysato akoon, waxaad heshay farriinta 'Cinwaanka emailka lama heli karo'

Tani waxay muujinaysaa in cinwaanka emailkaagu horeyba ugu jiray nidaamkeena. Adiga (ama qof kale oo isticmaalaya cinwaanka emaylkaaga) ayaa mar hore akoon ku sameeyey. Haddii aadan xasuusan ama aadan garanaynin furaha sirta ah ee akoonkan, waxaad u baahan doontaa inaad dib u bedesho furahaaga sirta ah adiga oo adeegsanaya tilmaamaha kore.

Arrinta #4: Haddii aad hesho farriinta ah 'Cinwaanka emailka ama furaha sirta ah wuu khaldanyahay'

Isku day mar labaad inaad ku qorto cinwaanka emailkaaga iyo furahaaga sirta. Ma xasuusnayd calaamada "@"? Cinwaanka emailkaagu waa inuu wato calaamada "@" waana inuu ku dhammaado .com, .org .net, iwm. Haddii farriinta khaladku kugu soo noqnoqoto, waxaad isku dayi kartaa inaad samaysato akoon khadka internetka oo cusub.

Arrinta #5: Sideen u beddelaa Cinwaanka Emailka ee akoonkayga Khadka Internetka?

Cinwaanka emailka lama beddeli karo Akoon cusub waa in lagu sameeyo cinwaanka email cusub.